WARGEYSKA
FSAN
Saddex bille ka faallooda arrimaha jaaliyadda Soomaalida Netherlands

CADADKA 23AAD | DAABACAADDA | 01 APRIL 2022

6 Febaraayo, maalinta ka hortaga gudniinka gabdhaha

#23

Waxaan dadaal ugu jirnaa sidii aan dib u habeyn ugu sameyn laheyn howsha safaarada aan ku leenanay Belgium

TUSMADA

DANJIRAHA CUSUB EE SOMALIA U FADHIYA BELGIUM & EU OO LA KULMAY SOOMAALIDA NETHERLANDS 3

Hawlaha mashruuca tacdiyadda iyo dhaqamada xun 5

Tababarka tabarayaasha 5

8-da Maarso, maalinta haweenka aduunka ee sanadkan 2022 6

Sida ay ku timid 8da Maarso 6

Munaasibada maalinta caalimiga 6da Febaraayo oo sanadkan lagu qabtay magaaladda Groningen 7

Arrimaha caalamiga ah 7

FSAN oo bilowday barnaamijyo podcast ah 7

DANJIRAHA CUSUB EE SOMALIA U FADHIYA BELGIUM & EU OO LA KULMAY SOOMAALIDA NETHERLANDS

Safiirka Soomaaliya u fadhiya Belgium iyo wadmada Midowga Yurub Yonis Yasin Hashi iyo wafdi uu hogaaminayo ayaa 13 Maarso 2022 la kulmay qeybaha kala duwan ee jaaliyadda Soomaalida ku dhaqan dalka Netherlands, iyadoo kulankaasii u jeedkiisu ahaa isbarasho iyo warbixin guud oo uu safiirka jaaliyadda ka siiyo howlaha diblomaasiyadeed ee safaarada iyo sidii ay uga qeyb qaadan lahaayeen dayactirka iyo dib u hagaajinta guriga safaarada ay leedahay.

Kulankan oo ka dhacay magaalada Den Haag ayna ka soo qeyb galeen qurbo-joogta Soomaalida dalalka Netherlands iyo Belgium. Kulankaasi waxaa uu soo qaban qaabiyey dallada ururada Soomaalida ay ku mideysan yihiin dalka Nederland ee FSAN.
Ugu horeyn waxaa halkaasi ka hadlay gudoomiyaha FSAN Ali Ware oo sheegay in Soomaalida Netherlands ay ku faraxsan yihiin inay soo dhoweeyaan safiirka cusub ee Soomaaliya ee Belgium iyo wadamada Midowga Yurub, ayna diyaar u yihiin inay la shaqeeyaan.

Ali Waxa uu ka warbixiyey xaalada jaaliyadda Soomaalida ee Netherland oo ku tilmaamay inay yihiin bulsho u midooba marka ay timaado in xaalado u baahan in wax laga qabto sida gurmadka abaarahii dalka ka dhacay.

Sidoo kale waxa isna halkaasi ka hadlay Ali Yaxye oo aqoonyahanada qurbo-joogta Soomaalida Nedeland, isagoo sheegay in jaaliyadda Soomaalida ay ka filayaan danjiraha cusub wax qabad muuqda iyo inuu wax ka badelo qaabka shaqada ee safaarada Soomaaliya ee dalka Belgium.

Danjire Yonis oo la hadlaya jaaliyadda Soomaalida Netherlands

Abdulkadir Ali Nuune, gudoomiyaha jaaliyadda Soomalida Zwolle ee dalka Netherlands ayaa isna halkaasi ka hadlay, waxa uuna sheegay in safiirka cusub Amb. Yonis looga fadhiyo inuu wax ka qabto dadka Soomaaliyeed ee ka soo baxsaday dagaalka Ukraine iyo Ruushka, loona fududeeyo warqadaha ay u baahan yihiin.

Waxa uu sidoo kale Abdulkadir sheegay in ka jaaliyad ahaan ay wadaan dadaalo ku saabsan sidii ardayda Soomaalida ee ka soo cararaya dagaalka Ukraine ka socda deganaanshiyo loogu saari lahaa baasabooradooda, maadaama buu yiri aan loo aqoonsaneyn qaxootinimo oo dalka Ukraine ay ku joogeen fiisooyin waxbarasho.

Dhamaan Soomaalidii goobtaasi ka hadlay waxay soo dhoweeyeen danjiraha cusub ee Yonis oo ku booriyeen inuu wax ka qabto baahida Soomaalida qaar ee ku nool Yurub kaga xiran waraaqaha safaarada.

Waxaa sidoo kale munaasibadaasi goob joog ka ahaa Abdi Lucky oo ah orodyahan Soomaaliyeed oo dalka Belgium-ka kaga qeyb galay orodka dheer (Marathon) oo heer caalami ah oo ay ka qeyb galeen in ka

badan 200 oo orodyahan oo aduunka ka kale yimid. Tartankan oo ahaa Half-marathon ah ayaa waxa uu ka galay kaalinta 21-aad, isagoo ku ordayey magaca Soomaaliya.

Abdi waxa uu sheegay markii uu yimid dalka Belgium ay aad u soo dhoweeyeen Soomaalida Belgium-ka iyo Netherlands. Waxa uu sheegay inuu aad ugu faraxsan yahay inuu arko Soomaali badan oo garabkiisa taagnaa markii uu tartankan ka qeyb galayey.

Danjire Yonis Yasin Hashi, safiirka Soomaaliya ee Belgium iyo EU-da oo goobta ka hadlay ayaa ku dheeraaday ka hadalka howlaha diblomaasiyadeed ee safaarada u yaalla iyo sidii ay u xalin laheyd cabaqadaha horyaalla oo ay ugu horeyso sidii dayactir loogu sameyn lahaa dhismaha guriga safaarada oo uu sheegay in geedo badan ay ku baxeen, loona baahan yahay in wax laga qabto xaaladiisa, maadaama uu yahay guriga ay leedahay safaarada.
Safiirka waxa uu ka codsaday jaaliyaddaha Soomaalida ee Holland iyo Belgium-ka inay ka qeyb qaataan sidii loo badbaadin lahaa, loona dayactiri lahaa guriga safaarada.

Dadkii munaasibada ka soo qeyb ayaa iyaga dhinacooda waxay sheegay inay si mutadawacnimo ah ay uga qeyb qaadanayaan hagaajinta iyo dayactirka gurigaasi oo ah hanti uu leeyahay qaranka Soomaaliya.

Jaaliyadda Soomaalida Netherlands waxay muujiyeen sida ay diyaarka ugu yihiin inay la shaqeeyaan danjiraha oo wax looga qabto dhibaatooyinka jira.

Yonis waxa kale oo uu ka hadlay dhibaatada Soomaalida ku go'doonsan dagaalka ka scoda dalka Ukraine, isagoo sheegay inuu dadaal xoogan ku bixiyey sidii Soomaalidaasi oo u badan arday loo soo badbaadin lahaa, uuna ku guuleystay arrintaasi.

Waxa uu ku amaanay Soomaalida degan dalka Netherlands sida ay had iyo jeer u garab-taagan yihiin taageerida iyo soo dhoweynta madaxda safaarada. Waxa uu balan qaaday inuu wax ka qabanayo dhaliilahii horey uga jiray safaarada, isagoo dhinaca kalena ka dalbaday qurbo-joogta Soomaalida Yurub inay la shaqeeyaan safaarada oo ay u arkaan mid iyaga u adeegaysa.

Intaasi wuxuu raaciyey safiirka inuu wado dadaalo xoogan oo ku saabsan sidii loo xoojin iskaashiga diblomaasiyadeed ee ka dhexeeya safaarada Soomaaliya ee Belgium-ka iyo wadamada Midowga Yurub.

Ugu dambeyn waxaa madasha ka hadlay Dr. Mohamed Said, xoghayaha dallada FSAN oo u mahad celiyey dadkii ka soo qeyb galay madasha, isagoo ku booriyey Soomaalida inay si harag la'aan ah uga qeyb qaataan dayactirka iyo hagaajinta guriga safaarada ay leedahay..

Intii ay xaflada socotay, waxaa halkaasi heeso wadaniyad iyo madadaalo ah ka qaadayey fanaanka Abdi Baadil iyo sidoo kale Mohamed Weerow. Waxay munaasibada ka qaadeen heeso aad u soo jiitay dadkii goobta joogay.

Hawlaha mashruuca tacdiyadda iyo dhaqamada xun

Tababarka tabarayaasha

FSAN ayaa 19 en 26-kii bishii Maarso 2022 waxay qabatay tababar loogu magaca daray Trababarka tabarayaasha (Train de trainers) oo ujeedadiisu tahay in la helo tabarayaal tababara xirfadlayaasha (professionals) kala duwan sida qolada qaxootiga la shaqaysa, caafimaaka, maclimiinta dugsiyadda, Boliiska iwm.

Tiradda tabarayaasha waxay ahaayeen 8 qof oo laga soo doortay wacyigeliyaashii olalaha ka hortagga gudniinka gabdhaha, waxayna asal ahaan ka soo jeedaan Sudan , Somalie, Eritrea, Irak-Kurdisch, Egypt.

Tababarayaasha waxaa u dhiman inay qaatay tababar 2 maalmood oo kale , markay dhamaystaan waxaa laga rabaa inuu qof kasta qabto 2 jeer oo tababar ee dhinaca xirfadlayaasha.

Tababarkan oo lagu qabtay magaalada Amsterdam, waxay ka qeyb galayaasha la siiyey casharo ku saabsan sida ugu wanaagsan oo cashar loo bixiyo, iyo waxyaalaha loo baahanayahay inaad maskaxda ku hayaan, qaabka jeedinta sida lagu bilaabo cashar bixinta ilaa dhamaystirka, codkaaga inuu fasiix noqday iwm.

8-da Maarso, maalinta haweenka aduunka ee sanadkan

Sanad kasta waxay aduunyada xustaa maalinta 8da Maarso oo ah maalinta haweenka oo Q.M ay u aqoonsatay maalin caalami ah oo loo dabaaldego xaquuqda ay leeyihiin dumarka iyo in maalintaasi laga hadlo caqabadaha weli ku horgudban iyo sidii looga soo afjari lahaa takoorka xaga jinsiga.

Q.M ayaa sanadkan 2022-ka u doortay xuska maalinta haweenka halku dhiga ah "Horumarinta Sinaan Jinsiga", sida ay sheegtay Dr. Maxime Houinato, aggaasimaha hay'ada Q.M u qaabilsan xaquuqda dumarka ee bariga iyo koonfurta Afrika.

Qarniga 21aad, haweenka aduunka waxay wajaheen caqabado kaga yimid dhinaca isbadelka cimilada, sida lagu sheegay baaris ay sameysay Q.M. Warbixinta waxaa lagu sheegay in haweenka ay yihiin kuwa ugu badan ee ku dhinta musiibooyinka dabiiciga, sida lagu daabacay barta internet-ka ee hay'ada xaquuqda haweenka ee Qaramada Midoobay.

- 95% dadkii ku dhintay fatahaadihii ku dhuftay Solomon 2014 waxay
- ahaayeen haween.
- 55% dhimashada dhulgariirkii 2015 ku dhuftay Nepal waxay ahaayeen haween.
- 59% dadkii ku barakacay duufaantii Idai 2019 ee Malawi ahaayeen haween.

Dhibaatooyinkan waxay saameyn muuqata ku yeesheen xaalada nololeed iyo mida dhaqaale ee haweenka ku nool wadamada soo koraya.

Intaa waxaa dheer, masiibooyinka isbadelka cimilada la xiriira ayaa sii xumeeyay dhibaatooyinka dhaqan-dhaqaale.

Sida ay ku timid 8da Maarso

Waxay maalintan markii ugu horeysay soo shaac-baxday waqtigii dhaqdhaqaaqa ururada shaqaalaha ee1908-dii ka, dibna waxay Qaramada Midoobay u asteysay 8da Maarso, maalinta haween-weynaha aduunka sannadkii 1975.

In ka badan 15,000 oo haween ah ayaa sanadkii 1908-dii waxay socod ku mareen magaalada New York si ay u dalbadaan in loo kordhiyo saacadaha shaqada oo ku yaraa, mushaar wanaagsan iyo xaqa cod bixinta. Xisbigii Hantiwadaaga Mareykanka ayaa sanad ka dib ku dhawaaqaya Maalinta Haweenka Qaranka markaasi oo la qabtay xuskii ugu horeeyay.

Marxist Jarmal iyo haweeneydii aadka ugu ololeyn jirtay xuquuqda haweenka ee Clara Zetkin ayaa ahaa shaqsiyaadkii gundhigga u ahaa aqoonsiga nooca caalamiga ah ee Maalinta Haweenka Qaranka Maraykanka.

Munaasibada maalinta caalimiga 6da Febaraayo oo sanadkan lagu qabtay magaaladda Groningen

Arrimaha caalamiga ah

Xuska munaasibada maalinta ka hortaga gudniinka gabdhaha ee 6-da Febraayo ayaa sanadkan lagu qabtay magaalada Groningen ee waqooyiga Netherlands.



Munaasibadan ayaa waxaa soo qaban qaabiyey hay'ada Platform 6/2, oo ay iska kaashadeen Plan internationale Nederland, FSAN ,Pharos, Iyo qoladda caafimaadka waqooyiga Nederland.

FSAN sanadkaan waxay ahayd xiriiriyaha isku dabariddka barnaamijka kaas oo ah meerto. Waxaa sanadkan halku-dhig looga dhigay mowduuca ah "Muhimada wada shaqaynta" si loo ciribtiro gudniinka gabdhaha.

Goobta waxaa laga soo jeediyey macluumaad salka ku haya dhibaatada gudniinka gabdhaha iyo sidii loo joogin lahaa oo runtii u baahan shaqo badan, dada badan oo ka socday wacyigeliyaasha barnaamijkaan, shaqsiyaad hayáddo kala duwan ka socday iyo guddiga gemeentiga magaaladda ayaa ka qaybgalay..

FSAN oo bilowday barnaamijyo podcast ah

FSAN waxay sanadkan bilowday barnaamiyo taxane ah oo podcast ah oo la xiriira mashruuca kor ku xusan waxaana Podcast-yagii ugu horreeyay ka soo muuqday Youssif Ouro-Akonda, oo ah xubin muhiim ah oo ka tirsan wacyigeliyayaasha ka hortagga gudniinka gabdhaha.

Youssif wuxuu deganyahay magalaadda Amsterdam asal ahaan wuxuu ka soo jeedaa dalka Togo, wuxuuna ku soo barbaaray wadanka Gaana waxa uu ka sheekeeyay khibradiisa uu u leeyahay dhibaatooyinka caadadaas iyo doorka ragga ee la dagaalanka caadadan.

Riix halkan si aad u dhageysato.